LINDESBERGS KOMMUN

Barn- och utbildningsförvaltningen

Rev. 2016-11-10

Kusoo dhowaada howlaha dugsiyada xanaanada ee degmada Lindesberg

Qoraalkani waa warbixin ku saabsan

- Sharciyada ku wajahan howlaha xanaanada degmada
- Sharciyada dhinaca hirgelinta ee ku saabsan dugsiyada xanaanada ee degmadu maamusho
- Waa maxay macnaha in la howlgeliyo dugsi xanaano oo si gaar ah loo leeyahay ama si ay barbaarini ku dheehan tahay. Waa maxay waxyaalaha loo baahan yahay si degmadu u ogolaato in dhaqaale la siiyo dugsigaas xanaanada sida gaarka ah loo leeyahay
- Waa noocee dugsiyada xanaanada ee ka jira degmada Lindesberg

Ma dooneysaa inaad warbixin dheeraad ah ogaatid waxaan kugu soo dhoweyneynaa inaad la xiriirto caawinaada iyo xanaanada ee qaabilsan arrimaha dugsiyada xaafada aad degan tahay. Magaca iyo taleefoonada waxaad ka heli kartaa baalka ugu dameeya warbixinta qoraalkan.

Waxaad kaloo eegi kartaa hoyga dhinaca internetka ee degmada Lindesberg www.lindesberg.se halkaas waxaad ka heleysaa warbixin dheraad ah oo ciwaankeedu yahay

caawinaad dhinaca internetka ah oo ku wajahan dugiga xanaanada iyo kan ilmuhu tagaan iskuulka ka dib (E-tjänster för förskola och fritidshem)

TUSMADA TAXANAHA

SHAQADA DUGSIGA XANAANADA 4

SHARCIYADA DHAMAAN DUGSIYADA XANAANADA EE DEGMADA 4

CARUURTA WAALIDIINTA SHAQEEYA AMA WAX BARTA 4

Caruurta waalidiinta shaqada la` 4

Caruurta waalidiinta ku maqan fasax, maadaama ay ilmo yar yar guriga ku hayaan 5

Caruurta qaybta ka ah dugsiga xanaanada guud 5

Xanaaneynta caruurta ee ka yar 15 saacadood. 6

Caymiska 6

Jedwalka 6

Sharciyada iyo nidaamka dhaqangelinta ee dugsiyada xanaanada ee degmadu maamusho 7

Codsiga 7

Kharashka la bixiyo 7

Waa imisa kharashka la bixiyaa? 9

Kharashka laga bixiyo ilamaha dugsiga xanaanada dhigta : 9

Kharashka xanaanada caruurta ee wakhtiga iskuul maalmeedku soo dhamaado: 9

Dadka ay waajib ku tahay iney kahrash bixiyaan 9

Maxaa loo xisaabaa dakhli ahaan? 10

Tusaale muujinaaya sida loo xisaabo 10

Bilowga ilmaha ee xanaanada (inskolning) 10

Jedwalka 10

Baahida xanaanada ilmaha , wakhti aan jedwalka ku jirin 11

Maalmaha waxbarashada shaqaalaha 11

Howlaha wakhtiga kuleylaha 11

Caruur xanuunsan 11

Caruurta u baahan taageero gaar ah 12

Wadahadalka horumarinta 12

Ka joojin (avstängning) 12

Ka tegitaanka booska caadiga ah ee xanaanada iyadoo loo wareegaayo nidaamka guud ee xanaanada 12

Geediga degmada dhexdeeda ah 12

Iska dhiibista booska xanaanada ee ilmaha 13

Muxuu yahay macnaheedu in la howlgeliyo xanaano si gaar ah loo leeyahay.Maxaase loo baahan yahay? 14

Qaybaha iskuulada ee waaxda caruurta- iyo tacliinta 16

SHAQADA DUGSIGA XANAANADA

Degmada Lindesberg waxaa ay leedahay dugsiyo xanaano oo degmadu maamusho iyo kuwo si gaar ah loo leeyahay kuwaasoo loo diyaariyey caruurta da`doodu u dhexayso 1-5 jir.

Waalidiinta iyo masuuliyiinta caruurtu waxaa ay xaq u leeyihiin iney caruurtooda u dooraan xanaano ku haboon. Xitaa waxaa jira fursad aad ku dooran kartid dugsi xanaano oo ku yaal degmo kale. Foomamka la buuxiyo waxaa aad ka heli kartaa hoyga internetka ee degmada., www.lindesberg.se.

Xanaanadu waa howl- wadareed ay hogaamiyaan barbaariyayaal. Xanaanadu waa iney ku taal guri ama qolal ku haboon howlaha caruurta, waana inuu waafaqsan yahay manhij-tacliineedka dhalaanka yar yar.

Dugsiga xanaanadu waxaa uu leeyahay manhij tacliineed u gaar ah kaasoo ku dhisan daryeel iyo barbaarin oo horseeda talaabada kowaad ee barasho joogto ah nolosha oo dhan. Manhij tacliineedka xanaanadu waxaa uu xooga saaraa muhiimada ay dheesha ama ciyaartu u leedahay horumarinta ilmaha iyo waxbarashadooda. Dugsiga xanaanadu waa inuu ahaadaa mid farxad leh, kalsooni lagu qabo oo amaan ah, caruurtuna dhigataana wax ka bartaan.

Degmadu waxaa ay masuul ka tahay in dugsiga xanaanadu yeesho tayo wanaagsan. Waa iney joogaan shaqaale leh tacliin, khibrad iyo ku haboonaansho qof ahaaneed si caruurtu u helaan barbaarintii loo baahnaa. Kooxaha caruurtu waa iney isu dheelitiran yihiin, tiradooda, qolalka la degan yahay iyo qalabkuna yahay mid ku haboon howsha iyo ujeedada la higsanaayo.

Dugsiga xanaanadu waa inuu markasta howshiisa ku saleeyaa ilmo kasta baahida gaarka ah ee uu qabo.

SHARCIYADA DHAMAAN DUGSIYADA XANAANADA EE DEGMADA

Xanaanada iyo barbaarinta waxaa loo diyaariyey dhamaan caruurta ka diiwaann gashan degmada. Xitaa caruur kale oo degmooyin kale ka yimid ayaa ka qaybqaadan kara howshaan. In caruurta la geeyo xanaanada waxaa ay leedahay sababo muhiim ah.

CARUURTA WAALIDIINTA SHAQEEYA AMA WAX BARTA waxaa ay xaq u leeyihiin iney joogaan xanaanada wakhtiga waalidku shaqada ku jiro ama waxbarashada, iyo weliba waktiga ay qaadato inuu u safro ama ka yimaado shaqada. Kolka waalidku firaaqo yahay ama uu fasax leeyahay uma laha xaq in caruurta xanaanada uu geeyo.

Waalidiinta habeenkii shaqeeya waxaa la siiyaa afar saacadood kolka ugu horeysa ee uu shaqada haneenkii ah galo. Waktiga ku haboon xanaanada waxaa lagula heshiinayaa madaxa ugu sareeya maamulka xanaanada. ee Xanaaneynta iyo barbaarinta, waxaa la helaa inta lagu dhexjiro wakhtiga ay furan tahay xanaanadu.Balse lama siiyo qoysaska mid waalidiinta ka mid ahi guriga joogo.

CARUURTA WAALIDIINTA SHAQADA LA` waxaa la siiyaa wakhti ay ilmahooda geystaan dugiga xanaanada. Wakhtigaas ayaa ah mid la xaddidey oo la

koobay. Ilaa 15 saacadood usbuucii ayey helaan ilaa 31 –da bisha luuliyo ee uu ilmuhu buuxiyo 6 sano. Caruurta iskuulka dhigata ee waalidiinta aan shaqeyn lama siiyo wakhti caruurta laga hayo oo aan ka ahayn kolkii waaalidkaasi ku jiro shaqo ku meel gaar ah ama waxbarasho ku meel gaar ah.

Xannaano kasta iyada ayaa soo qorsheysa , jedwalna usoo dejisa 15 saacadood ee ilmuhu usbuucii xanaanada joogaan. Halkaan waxaa tixgelin la siinayaa cadadka shaqaalaha leh tababar tacliimeed, waajibaadka in caruurtu xanaano helaan ama sabab kale oo ku wajahan baahida caruurta. Jedwalka aasaasiga ahi waa in ugu yaraan yahay 3 goor/ usbuuciiba ugu yaraan.Madaxa maamulka xanaanada ayaa go,aamiya jedwalka balse waa laga leexan karaa qaabkaas haddii la goáamiyo in ilmuhu u baahan yahay qaab kale oo xanaaneyn ah oo salka ku haysa qaab urureedka iyo barbaarinta laga heli karo xanaanada.

CARUURTA WAALIDIINTA KU MAQAN FASAX, MAADAAMA AY ILMO YAR YAR GURIGA KU HAYAAN Haddii cunuga xanaanada u baahan uu la dhashay ilmo yar oo hooyadu guriga ku hayso, waxaa uu xaq u leeyahay ilaa 15 saacadood usbuuciiba. Caruurta waalidka ilmaha guriga la jooga ee horay u haystey jedwal xanaano, waxaa uu haysanayaa jedwalkaas ilaa ilmaha yar ee guriga lagu hayaa uu ka gaaraayo muddo bil ah. Wakhtigaas ka dib waxaa la dhaqangelinayaa sharcigii ahaa 15-ka saacadood usbuuciiba. Xanaano walbaa iyada ayaa soo qorsheyneysa sida ay u ekaaneyso 15-kaas saacadood ee la doonaayo in ilmuhu helo usbuuciiba. Halkaan waxaa kaloo tixgelin la siinayaa in ilmuhu u baahan yahay qaab kale oo xanaaneyn ah oo salka ku haysa qaab urureedka iyo barbaarinta laga heli karo xanaanada ama sababo kale oo muhiim u ah baahida xanaano ee ilmaha. Jedwalka aasaasiga ahi waa inuu ugu yaraan yahay 3 goor/usbuuciiba. Madaxa maamulka xanaanada ayaa go,aamiya jedwalka balse waa laga leexan karaa qaabkaas haddii la goáamiyo in ilmuhu u baahan yahay qaab kale oo xanaaneyn ah oo salka ku haysa qaab urureedka iyo barbaarinta laga heli karo xanaanada

CARUURTA QAYBTA KA AH DUGSIGA XANAANADA GUUD. Laga bilaabo dayrta ilmuhu buuxiyo 3 sano waxaa uu xaq u leyahay ilaa 525 saacadood oo ah barbaarin xanaano oo lacag la`aan ah. Dugsiga xanaanada guud waxaa howshiisu hoos tagtaa degmada ama iskuulo si gaar ah loo leeyahay balse kuma jiraan guryaha loo isticmaalo qaab xanaano oo kale ah.Dugsiyada guud ee xanaanadu waxaa ay raacaan oo ay furan yihiin wakhtiyada ay furan yihiin dugsiyada hoose/dhexe.

Caruurta u baahan in la hayo, kuwaas oo qayb ka ah qorshaha guud ee xanaanada waxaa 15 saacadood ee hore loo xisaabaa siddii qorshe guud ee xanaano.

Sidaas darteed waxaa lacagta la bixinaayo la yareeyaa ama hoos loo dhigaa ilaa 68,75 % sanadkii oo dhan. Xaaladaha kale sida ilmo u baahan waxyar oo hayn ah ama xanaano ah waxaa uu isaguna qayb ka yahay qorshaha xanaanada guud , waxaana 15 saacadood looga dhigaa kuwo raaca nidaamka qorshaha guud ee xanaanada. Haddii aad sabab jirta awgeed aad ka waalid ahaan doonеysid inaad u bedelato oo keli ah qorshaha guud ee xanaanada (15 saacadood/usbuucii) waa in booska la iska dhiibaa laba bilood ka hor inta aan iskudelidaasi dhicin..eeg bogga 9 àad

Caruurta ku jirta barnaamijka xanaanada guud oo keli ah oo aan u baahnayn il- ku hayn gaar ah uma baahna iney wax kharasha ah bixiyaan.

Dugsi kasta ee xanaano waa inuu soo diyaariyaa jedwal aasaas ah oo ku wajahan 15-ka saacadood oo ku fidsan usbuucii oo dhan. Halkaan waxaa kaloo tixgelin la siinayaa in ilmuhu u baahan yahay qaab kale oo xanaaneyn ah oo salka ku haysa qaab urureedka iyo barbaarinta laga heli karo xanaanada ama sababo kale oo muhiim u ah baahida xanaano ee ilmaha. Jedwalka aasaasiga ahi waa inuu ugu yaraan yahay 3 goor/usbuuciiba. Madaxa maamulka xanaanada ayaa go,aamiya

jedwalka balse waa laga leexan karaa qaabkaas haddii la goáamiyo in ilmuhu u baahan yahay qaab kale oo xanaaneyn ah oo salka ku haysa qaab urureedka iyo barbaarinta laga heli karo xanaa-nada

Caruurtu waxaa ay xaq u leeyihiin iney joogaan dugsiga xanaanada iyadoo la eegaayo baahidooda (Sharciga iskuulada qodobadiisa 8, § 5 iyo 7.)

XANAANEYNTA CARUURTA EE KA YAR 15 SAACADOOD. Caruurta u baahan xanaano ka hooseysa ama ka yar ilaa 15 saacadood usbuuciiba waxaa ay xaq u leeyihiin barbaarin u dhiganta 15 saacadood. Wakhtiga waxaa loo qaybinaya maalmaha si il-muhu u helo barbaarintaas ilaa 3 maalmood oo markiiba ah ugu yaraan 3 saacadood

CAYMISKA

Dhamaan caruurta ka diiwaan gashan degmada Lindesberg ee ku qoran dugsiyada xanaanada degmada ama kuwa sida gaarka ah loo leeyahay waxaa ay ku jiraan caymiska degmada maalintii oo dhan.Jawaabta warqada caymiska waxaa aad ka heli kartaa hoyga dhinaca internetka ee degmada. www.lindesberg.se.

JEDWALKA

Dhamaan caruurta ku qoran dugsiyada xanaanada iyo barbaarinta waa iney soo gudbiyaan jedwal, kaasoo ay kusoo qorayaan aaladayada dhinaca internka ee la yiraa (E-tjänst).Jedwalka waxaa uu muujinayaa inta saacadood ee ilmuhu joogaayo xanaanada . Taasi waxaa ay saldhig u noqoneysaa diyaarinta ama qorsheynta shaqaalaha iyo dhaqaa-laha ee dhinaca howlaha xanaanada.

Jedwalka waxaa keliya oo ku cad wakhtiga ay waalidku shaqeynayaan ama waxbaranayaan iyo wakhtiga ay qaadato iney shaqada ama tacliinta usocdaan ama ka imaanayaan.

SHARCIYADA IYO NIDAAMKA DHAQANGELINTA EE DUGSIYADA XANAANADA EE DEGMADU MAAMUSHO

CODSIGA

Markii aad ilmahaaga ka diiwaan ´gelineysid dugsiyada xanaanada waxaa aad dalbaneysaa boos xanaano adigoo isticmaalaaya aalada diiwaangelinta ee dhinaca internetka ee lagu magacaabo (E-tjänst) Halkaas ayaad si toos ah uga bilaabeysaa diiwaan gelinta codsiga. Maadaama diiwangelinta iyo howlaha nidaaminta codsigu ay wakhti qaataan waxaan dooneynaa inaad diwaangelinta bilowdo afar bilood ka hor inta aan ilmuhu xanaanada bilaabin.

Waalidka doonaaya boos ka mid ah xanaanada guud waxaa uu la xiriirayaa caawinaha waaxda barbaarinta caruurta ee qaybta aad degan tahay ee ku wajahan arrimaha xanaanada. Xiriirka caawinaha waxaa laga heli akraa bogga ugu dameeya
Haddii aad dooneysid inaad ilmahaaga u diiwaan gelisid dugsi xanaano oo ku yaal degmo kale , waa inaad la xiriirtaa waaxda arrimaha xanaanada ee xaafadaada si ay kuu siiyaan warbixin ku saabsan jidka aad qaadi lahayd iyo waxii aad samayn lahayd.

Waxaad boos xanaano ka dalban kartaa dugsi xanaano oo ka baxsan meesha aad degan tahay ee aad ka tirsan tahay balse dadka degan ee ku qoran xaafada aad ka dalbatay booska xanaano ayaa kaa horeeya oo ugu horeyn boosaska la siinayaa. Markii aad rabtid inaad boos xanaano ka dalbatid meesha aad degan tahay meel aan ahayn waxaad buuxineysaa foomka la yiraa ” Doorasho xanaano”. Waxaadna u direysaa qaybta qaabilsan arrimaha xanaanada iyo barbaarinta caruurta ee xaafadaada. Foomka waxaa aad ka heli kartaa hoyga dhinaca internetka ee degmada. www.lindesberg.se.

Ogow codsiga dalbashada booska xanaanada waa la xirayaa kolkii ilmuhu boos ka helo xanaanada. Marka ugu horeysa sanad ka dib helitaanka booska xanaanada ayaad samayn kartaa codsi cusub oo ku wajahan dugsi kale oo xanaano oo degmadu leedahay.

Haddii aadan deganeyn degmada Lindesberg balse aad qorsheyneyso inaad usoo guurto waa inaad ilmahaaga u samaysaa dalab codsi xanaano sida ugu dhaqsaha badan. Haddii wakhtiga aad dalabka samayneysaan aydinaan ogeyn xaafada aad degi doontaan kolkaas waxaad dalabka ku wajahi kartaa mid ka mid ah dugsiyada xanaanada degmada. Waa muhiim in sida ugu dhaqsaha badan aad usoo gudbisaan ciwaanka cusub ee guriga aad degi doontaan.

KHARASHKA LA BIXIYO

Markii aad leedahay ilmo dhigta dugsiga xanaanada waxaad bixineysaa kharash ku aadan booska ilmahaagu xanaanada ku leeyahay.

Kharashka la bixiyo xanaanada waxaa uu ku salaysan yahay dhaqaalaha guriga uu ilmuhu ka diiwaan gashan yahay.
Kharashka waxaa waalidku bixinayaa 12 bilood. Balse bil walba iskeed ayaa kharashka loo soo dirayaa si waalidku u bixiyo. Kharashka waa la bixinayaa inta ilmuhu boos ku leeyahay xanaanada, xitaa wakhtiga ilmuhu xanuunsan yahay , wakhtiga xagaaga ama fasaxa.
Lacagtu waa iney degmada soo gaartaa maalinta ugu damaysa bisha ee ay bangiyadu shaqeeyaan.

Si toos ah ayaa lacagtaas looga goosan karaa bangigaaga haddii aad adigu ogolaato. Foom la buuxiyo oo aad ku ogolaaneyso in si toos ah lacagta lagaaga gooyo waxaad ka heli kartaa xafiiska qaabilaada ee waaxba xanaanada.

Qoyskii aan lahayn wax dakhli ah oo soo gala ma ay bixinayaan wax kharash ah oo ku wajahan xanaanada. Balse warbixin ku saabsan inaan dakhli kusoo gelin waa in mar walba la dhiibaa, waxaana lagu qorayaa in dhakhligaagu yahay 0 karoon.

Dayrta ilmuhu buuxiyo 3 sano ,waxaa bilaabanaaya qorshaha guud ee dugsiyada xanaanada, kharashka la bixiyaana waxaa loo dhigaa hoos 68,75 % laga bilaabo 1-da agoosto.

Caruurta leh walaalo ku meeleysan xanaanooyinka gaarka loo leeyahay, waxaa iyagana lagu fulinayaa sharciyada quseeya ilamaha walaalaha ah ee dhigta dugsiyada xanaanada ee degmadu leedahay.

Qaabkii ka duwan kaas aan soo sheegnay waxaa loo wajahayaa si gaar ah (shakhsiyan) ah , waxaana goàankeeda leh waaxda tacliinta ee degmada, qaybteeda shaqada.

WAA IMISA KHARASHKA LA BIXIYAA?

Kharashka uu ku kaco hal cunug(1) oo xanaanada kuu dhigtaa waa 3 % ee dakhliga qoyska inta aan la cashuurin. Kharashka u dhigma ee in hal cunug (1) kuu dhigto , barta ilmaha la geeyo iskuulka ka dib waa 2 %.

Kharashka la bixiyaa ee caruurta xanaanada dhigataa waa mid sii yaraaada mar kasta oo ay kordhaan caruurta kuu dhigata xanaanada. Sidaan ayaa kharashka aad bixineyso loo xisaabaa. Ilmaha 1àad waxaa la yiraahdaa ilmaha ugu yar ee qoyska u dhigta xanaanada ama meesha la geeyo iskuulka ka dib. Ilmaha 2`aad waa kan ku xiga kan ugu yar qoyska, sidaas baa lagu sii socdaa.

KHARASHKA LAGA BIXIYO ILAMAHA DUGSIGA XANAANADA DHIGTA :

Kuma xirna dhererka wakhtiga ilmaha la hayo

Ilmaha 1: waxaa la bixinayaa 3 % ee dakhliga qoyska , balse ugu badnaan 1 362 bishiiba.
Ilmaha 2: Waxaa la bixinayaa 2 % ee dakhliga qoyska balse ugu badnaan 908 karoon bishiiba
.
Ilmaha 3: Waxaa la bixinayaa 1 % ee dakhliga qoyska balse ugu badnaan 454 karoon bishiiba
.
Ilmaha 4: Waa lacag la àan .

Caruurta qaybta ka ah qorshaha guud ee xanaanaada ,kuwaasoou baahan iney joogaan xanaano, waxaa kharashka laga yareyaa ilaa 68,75 % oo sanadka oo dhan ah, maaha oo keliya inta ay xanaanada dhigtaan.

KHARASHKA XANAANADA CARUURTA EE WAKHTIGA ISKUUL MAALMEEDKU SOO DHAMAADO:

Dhererka wakhtiga ay ilmuhu joogaan xanaanada iskuulka ka damaysaa saamayn kuma yeelato kharashka la bixinaayo.

Ilmaha 1: waxaa la bixinayaa 2 % ee dakhliga qoyska soo gala ,balse ugu badnaan 908 karoon bishiiba

Ilmaha 2: waxaa la bixinayaa 1 % ee dakhliga qoyska soo gala ,balse ugu badnaan 454 karoon bishiiba

Ilmaha 3: waxaa la bixinayaa 1 % ee dakhliga qoyska soo gala ,balse ugu badnaan 454 karoon bishiiba

Ilmaha 4: waa lacag la àan .

Goobaha kale ee ilmuhu tagaan ee aan waajibka ahayn ee ka dameeya wakhtiga iskuulka waxaa la bixiyaa 20 karoon maalintii iyo waxii kharash ah ee ku baxa howlaha caruurta loo qabanaayo.

Maalmo fasax ah – iyo maalmaha waxbarashada shaqaalaha iyo maalmo kale oo kel-keli ah (ugu badnaan 5 maalmood /bishiiba) waxaa kusoo biira kharash kale oo dheeraad ah oo ah 50 karoon haddii ilmaha horay, ka hor 14 maalmood loogu diiwaan geliyey inuu imanaayo xanaanada. Maalmo kale oo dheeraad ah oo ilmaha la haynaayo,tusaale ahaan haddii waalidku shaqo ama waxbarasho aado, kolkaas kharashku waxaa uu noqdaa 50 karoon maalintiiba.

DADKA AY WAAJIB KU TAHAY INEY KAHRASH BIXIYAAN

Bixinta kharashka xanaanada waxaa saldhig u ah dakhliga qoyska soo gala cashuurta ka hor.
Qoys waxaa loola jeedaa hooyada iyo aabaha wada nool , waalidka keliga ah iyo waalidka la nool xaas ay isla degan yihiin balse aaney weli isguursan.
Qoys nin iyo naag ah oo isqaba waxaa la mid ah iyaguna nin iyo naag isla nool balse aan isqabin sharciyan ,kuwaaso wada dhalay caruur la degan oo ku qoran ciwaanka qoyska.
Qoys nin iyo naag ah oo isqaba waxaa iyana la mid ah dad isku jinsi ah oo isla nool oo ku wada diiwaan gashan hal ciwaan.

Haddii aan waalidku wada nooleyn , waxaa kharashka xanaanada lagu saleeyaa dhakhliga waalidka ilmuhu la nool yahay ee uu ka diiwaan gashan yahay.

Haddii labada waalid midkood u baahan yahay in ilmaha laga hayo waxaa kaharshka xanaanada lagu saleeyaa waalidka degan guriga kharashka loo diraayo.
Haddii uu ilmuhu ku nool yahay guri aan ahayn kan waalidkiis waxaa kaharshka xanaanada lagu saleeyaa dakhliga reerkaas uu ilmuhu ku qoran yahay iyo weliba gunnada qoysku qaato.

Isbedel nololeed saameyn ku yeelan kara xanaanada ilmaha iyo kharashka la bixinaayo waa in mar walba loo soo sheegaa xafiiska qaabilaada iskuulada ee xaafada aad degan tahay.

MAXAA LOO XISAABAA DAKHLI AHAAN?

Dakhli ahaan waxaaa la xisaabaa waxii mushahar ah iyo dhakliyada kale ee la cashuuro, waxaana la eegaa cashuurta ka hor. Dakhli waxaa uu noqon karaa mushahar, lacagta kaa soo gasha shirkadaada, lacagta taageerida tacliinta,lacagta la siiyo qofka xanuunsan, lacagta waalidka ilmaha haya, lacagta qofka shaqada la`aanta la siiyo, lacagta howlgabka, lacagta laguu siiyo inaad shirkad ku aasaasto, lacagta xanaaneynta ilmaha xanuunsan iyo lacagta la siiyo qoysaska caruurta haya iyo kuwo kale oo badan.

Markii ilmahaagu uu bilaabo xanaanada waxaa waajib ah inaad dhiibto warbixin ku saabsan dakhliga soo gala qoyska. Taas waxaa la samaynayaa adigoo adeegsanaaya aalada dhinaca internetka ah ee la yiraa (E-tjänst). Haddii uu isbedel ku yimaado dakhliga qoyska ,waa inaad dhiibtaa warbixin cusub oo ku saabsan dakhliga cusub.

Haddii aadan soo gudbin warbixinta dakhliga kusoo gala , waxaa laguu soo dirayaa kharashka ugu badan ee xanaanada lagu bixiyo. Waxaa keliya oo la bedelayaa taas kolka aad keento dakhliga saxa ah ee qoyska soo gala. Markaas bisha ku xigta waxaa laguu soo dirayaa kaharashkii saxda ahaa ee ku wajahanaa xanaanada ilmaha.

Waaxda waxbarashada ee degmada waxaa ay 2015- kii go`aansatay in sanadkiiba mar la sameeyo hubin dhakhli ,kaasoo dib loo eegaayo dakhligii kusoo galay sanadkii hore.Taas macnaheedu waxaa weeye in dib loo saxo kharashkii la bixiyey.

TUSAALE MUUJINAAYA SIDA LOO XISAABO

Guri ama qoys ka kooban laba qof oo waaweyn iyo saddex caruur ah. Dakhli bileedka reerka waa 36 000 karoon cashuurta ka hor.

Ilmaha 1 ee dhigta xanaanada,waxaa soddon iyo lixkun lagu dhufanayaa boqolkiisa saddex (36 000 x 3 %) = 1 080 kr bishiiba .
Imaha 2 ee qaybta ka ah qorshaha guud ee xanaanada . waxaa loo xisaabayaa siddii cunuga kowaad iyadoo la isku dhufanaayo (36 000 x 2 %) = 720 x 68,75 % = 495 karoon bishiiba.
Ilmaha 3 ee dhigta xanaanada ka damaysa iskuulka waxaa kaharashku noqonayaa 36 000 kr x 1 % = 360 bishiiba. Wadarta kharashka waxaa uu noqonayaa 1 080 + 495 + 360 = 1 935 karoon bishiiba.

BILOWGA ILMAHA EE XANAANADA (INSKOLNING)

Kolkii ilmahaagu bilaabaayo xanaanada waa inaad ugu talogashaa wakhti aad ilmaha kula joogto xanaanada inta uu si toos ah ula qabsanaayo. Wakhtigaas ilmuhu la qabsanaayo iskuulka waxaa uu inta badan noqdaa ilaa laba usbuuc. Wakhtigaas bilowga ah ilmuhu waxaa uu si yar-yar u fahmaa oo u bartaa caruurta dhigata xanaanada iyo shaqaalahaba iyo qaabka looga shaqeeyo xanaanada. Waxaa uu kharashka xanaanadu kuu bilaabanayaa kolka uu ilmuhu si toos ah u bilaabo.

JEDWALKA

Dhamaan caruurta dhigata xanaanada ama goobaha barbaarinta waa ineys oo gudbiyaan jedwal ku saabsan wakhtiga ay ku qaadanayaan xanaanada. Taasi waxaa ay saldhig u tahay qorshaha

shaqaalaha iyo weliba waxyaalaha kale ee howlaha fududeetya sida dhaqaalaha oo kale.
Jedwalku waxaa uu ku saabsan yahay wakhtiga waalidku shaqada ama waxbarasho jiro iyo weliba wakhtiga ay qaadato inuu shaqada usii socdo ama uu ka yimaado.
Xanaanadu waxaa ay furan tahay 06.00-18.00.

Wakhtiga ilmaha la hayo oo si ku meelgaar ah hoos ugu dhaca , tusaale ahaan fasaxyada (fasaxa sanad-laha , fasax shaqo oo kooban med iwm) saamayn kuma yeelato kaharashka xanaanada aad ku bixineyso.Haddii isbedelku ku salaysan yahay shaqo laàan dhacday ama fasax waalid, waa in markaas aad gashaa aaladayada (E-tjänst) oo aad bedeshaa warbixinta saldhiga u ah goàaminta kaharashaka aad bixineyso.

BAAHIDA XANAANADA ILMAHA , WAKHTI AAN JEDWALKA KU JIRIN

- Waalidka u baahan in ilmaha loo hayo wakhti ka baxsan wakhtigii hore ee jedwalka ku xusnaa waa inuu soo diiwaangeliyaa saddex beri ka hor. Wakhtiga dheeraadka ah waxaa lagu meeleynayaa wakhtigaay xanaanadu furan tahay 06.00-18.00.
- Haddii baahida waalidka ee in ilmaha xanaanada loogu hayaa ay isbedesho, loona baahdo wakhti ka baxsan wakhtiga caadiga ah ee xanaanadu furan tahay, waa in markaas maamulaha ama madaxa xanaandu saddex beri gudhood uu go,aamiyaa isbedel ku yimaada jedwalka xanaada iyo shaqaalaha ka hor inta aan la bedelin wakhtiga.

Xanaanada ilmaha ee wakhtiga habeenkii ah waxaad ka heli kartaa dugsiga xanaanada ee (Tallbackens förskola) ee degmada Lindesberg iyo xanaanada (Skogsdungens förskola) ee ku yaal Frövi. Waalidiinta ayaa masuul ka ah keenitaanka iyo soo kaxaynta caruurta. Diyaarinta iyo qorsheynta xanaada habeenkii waxaa ay qaadataa ilaa laba usbuuc.
Xanaanada fiidadkii ee maalmaha shaqada waxaa laga heli karaa
• Dugsiga xanaanada Tallbacken (Tallbackens förskola i Lindesberg)
• Dugsiga xanaanada Skogsdungen (Skogsdungens förskola, Frövi)
• Dugsiga xanaanada ee Hagabacken (Hagabackens förskola, Guldsmedshyttan)

Xanaanada wakhtiyada fasaxa ah ee maalintii ah waxaa laga heli karaa
• Dugsiga xanaanada ee allbacken (Tallbackens förskola Lindesberg)
• Dugsiga xanaanada ee Skogsdungen (Skogsdungens förskola, Frövi)

MAALMAHA WAXBARASHADA SHAQAALAHA

Si shaqaalaha xanaanada ka shaqeeya u helaan wakhti ay qiimeyn ay ku sameeyaan xabsami u socodka howlaha xanaanada, isla markaasna aqoontooda u horeymariyaan waxaa ay u baahan yihiin maalmo waxbarasho oo ah ilaa afar jeer sanadkiiba.Xitaa taasi waa quseysaa xanaanada ilmaha ee wakhtiga ” aan habooneyn”.Maalmaha waxbarashada waxaa loo qaybiyey sanadka oo dhan.Qofkii aan awoodin inuu maalmahaas helo qaab uu u maareeyo xanaanada caruurta ,waxaa la heli karaa nidaam ama qaab arrintaas lagu xaliyo.La xiriir xanaanada ilmahaaga si laguugu sheego qaabka arinkaas loo xalin karo.

HOWLAHA WAKHTIGA KULEYLAHA

Inta wakhtiga kuleylaha lagu dhexjiro, xanaanooyin badan ayaa yareeya howshooda, sababtoo ah waxaa jira shaqaale badan oo fasax ku maqan. Dugsiyada xanaanada ee xaafadaha ayaa iskaashada ,waxayna howshooda isugu geeyaan hal dugsi xanaano si la isu kaashado usbuucyadaas.

CARUUR XANUUNSAN

Markii ilmahaagu xanuunsan yahay, waxaa waajib ah inaad usoo sheegto dugsiga xanaanada.Haddii ilmahaagu uu xanaanada ka maqan yahay wakhti dheer, sabab caafimaad awgeed waxaa ilaa 50% lagaa dhimayaa kharashkii aad bixin jirtey.Waa haddii wakhtiga xanuunku ka badan yahay 30 maalmood.Dalabkaas waxaad ku qoreysaa foom yaala xafiiska qaabilaada ee dugsiyada xanaanada. Waxaa kaloo ka heli kartaa hoyga degmada

www.lindesberg.se. Koobiga warqad dhakhtarna waa lagu lifaaqayaa.

CARUURTA U BAAHAN TAAGEERO GAAR AH

Howsha dugsiyada xanaanadu maaha mid isku si loogu samayn karo dhamaan caruurta. Caruurta jir ahaan, ama maskax ahaan u baahan caawinaad gaar ah si ay u hore maraan waa iney taas helaan. Caruurta u baahan caawinaada gaarka ah waa iney dugsiyada xanaanada ka helaan caawinaada ay u baahan yihiin. Waana in mar kasta laga duulaa baahida gaarka ah ee caruurtaasi qabaan.

Caruurta u jooga xanaanada iney helaan taageerada baahidooda dabooli karta , waxaa ay xaq u leeyihiin boos kharash la`aan ah oo xanaanada ah 15 saacadood usbuuciiba. Wakhtiga ka baxsan 15 saacadood waxaa ay bixinayaa 62,5 % ee kharashkii la bixin lahaa..

Meelaha ay ku yaalaan dugsiyada xanaanada eedegmadu maamusho, waxaa ku sugan koox taageero u fidisa shaqaalaha caawina caruurta u baahan taageerada dheeraadka ah. Kooxdaas shaqadeeda ugu horeysaa waa iney kaalmo siiyaan iyo caawinaad shaqaalaha si ay u helaan dariiqo cusub oo ay caruurtaas ku caawinaan.

WADAHADALKA HORUMARINTA

Dayr iyo gu`walba waxaa shaqaalaha xanaanadu wadahadal horumarineed la yeeshaan waalidka caruurta xanaanada dhigta. Wadahadalka horumarinta waxaa la raacaa nidaam degsan oo ku wajahan sida howl maalmeedka ilmaha u eg yahay kolka ay xanaanada joogaan, horumarka ilmaha iyo haddii ay caawinaad dheeraad ah u baahan yihiin. Adiga, waalid ahaana waxaad heleysaa fursad aad kaga hadasho waxii feker ah, su,aalona aad ku weydiin karto shaqaalaha.

KA JOOJIN (AVSTÄNGNING)

Haddii aadan bixin kharashka xanaanada ilmaha muddo 2 bilood ah , waxaa ilmaha laga joojinayaa xanaanada

KA TEGITAANKA BOOSKA CAADIGA AH EE XANAANADA IYADOO LOO WAREEGAAYO NIDAAMKA GUUD EE XANAANADA.

Haddii waalid ahaan aad sabab jirta awgeed rabtid inaad ugu bedelatid nidaamka guud ee xanaanada (15 saacadood /usbuuciiba) waa inaad booskaaga ilmaha iska dhiibtaa laba bilood ka hor inta aan isku bedelku imaanin.

GEEDIGA DEGMADA DHEXDEEDA AH

Tusaalaha 1`aad: Haddii uu qoys u guuraayo degmada dhexdeeda, uuna doonaayo boos xanaano oo cusub oo meel kale ah, waa in lala xiriiraa caawinaha howlaha xanaanada ee dugsiga xanaanada ee haatan ilmuhu dhigto inta aan geedigu dhicin..

Tusaalaha 2àad : Laba waalid ayaa kala degan laba meelood balse masuuliyada ilmaha ayey wadaagaan, labaduba waxaa ay u baahan yihiin boos xanaano ee ilmaha. Haddii ka guuro meesha hal waalid degan yahay oo uu u wareego xaafada waalidka kale degan yahay waa in xanaanada ilmuhu haatan dhigto lala xiriiraa si waalidka ilmuhu u wareegaayo uu u dhiibo warbixin buuxda.

Tusaale 3àad : Laba waalid ayaa kala degan laba meelood balse masuuliyada ilmaha ayey wadaagaan. Labaduba waxaa ay u baahan yihiin boos xanaano ee ilmuhu helo, maadaama uu ilmuhu hadba waalid la nool yahay. Haddii labada waalid ku heshiin waayaan xanaanada ilmaha la geynaayo, waxaa kolkaas la raacayaa sharciga ciwaanka ilmuhu ka diiwaan gashan yahay. Sharcigaas waxaa kaloo la raacayaa kolka ilmuhu iskuulka bilaabaayo.

ISKA DHIIBISTA BOOSKA XANAANADA EE ILMAHA

Markii ilmahaagu ka tegaayo ama ka baxaayo xanaanada waa inaad iska dhiibtaa booska xanaanada ee ilmuhu ku qoran yahay, adigoo adeegsanaya (E-tjänst) ee dhinaca internetka.

Waktiga ay qaadato inaad fasaxdo booskaas waxaa ay qaadataa ilaa laba bilood.Labadaas bbiloodna waad bixineysaa kharashka xananada. Waxaa wakhtiga iska dhiibida booska xanaanadu kuu bilaabanayaa maalinta aad foomka buuxiso.

Iska dhiibista booska xanaanada lama samayn karo marka lagu jiro fasaxa caadiga ah sida (fasax sanadeedka, iyo fasaxyada kale imw) ama kolka la bedesho qaabka ilmuhu xanaanada ugu baahan yahay.

Haddii aad booska xanaanada ilmahaaga aad iska dhiibto sabab la xiriirta fasax dheer, kolkaas waxaa laga yaabaa iney adkaato in ilmahaagu dib ugu soo laabto xanaanadiisii hore maadaama ay ka horeeyaan ilmo badan oo saf ku jirey.

Haddii aad bixiso kharashka booska ilmahaaga ee xanaanada xitaa kolkii uu fasax yahay, markaas waxaad xaq u leedahay in ilmahaagu kusoo noqdo booskiisii xanaanada.
Waxii fasax ah oo ka badan laba bilood, waxaa haboon in booska xanaanada la fasaxo ama la iska dhiibo.

MUXUU YAHAY MACNAHEEDU IN LA HOWLGELIYO XANAANO SI GAAR AH LOO LEEYAHAY.MAXAASE LOO BAAHAN YAHAY?

Waxaa jira qaabab kala duwan oo loo hawlgeliyo dugsiyada xanaanada ee sida gaarka ah loo leeyahay. Waxaa ay noqon karaan xanaano, ama meelaha ay caruurtu tagaan wakhtiga ka dameeya iskuulka. Waxaa iyana meesha ku jirta in howshu waafaqsan tahay nidaamka barbaarinta ee tacliinta ku dhisan.

Degmada waxaa waajib ku ah iney ogolaadaan codsigii buuxiya shuruudaha la iska doonaayo, e tayo wanaag iyo nabadgelyo sida qaybaha kale ee xanaanooyinka degmada.

Si loo buuxiyo shuruudaha waxaa jira arrimahaan:

- Shaqaaluhu waa iney leeyihiin tacliin, khibrad iyo ku haboonaan qof ahaaneed si baahida barbaarineed ee caruurta loo daboolo.
- Kooxaha caruurtu waa iney waa in loo kooxeeyey qaab isku dhaf ah, waana in aanay aad u badnayn.
- Meesha xanaanada laga dhigaayo, hoyga xanaanadu waa inuu ku haboon yahay caruur iyo howsha lagu qabanaayo.

Diiwaankaan dookumentiga ama caddeymaha qarani waa iney saldhig u yihiin howsha sida gaarka ah loo leeyahay ee la fulinaayo- förskolans läroplan
- Manhijka tacliineed ee iskuulka waajibka ah , xanaanada iyo xanaanada caruurtu tagaan iskuulka ka bacdi.
- Hayàda waxbarashada sharciyadeeda guud ee ku wajahan xanaanada ilmaha ee guri ku haynta ah.
(familjedaghem)

Haddii codsiga degmadu ogolaato waxaa soo raacaaya ogolaanshaha in degmadu bixiso tabarucaad dhaqaale iyo mid ku wajahan howlaha xanaanada sida gaarka ah loo leeyahay.
.
Caawinaada dhaqaale inta ay le.egtahay waxaa ay ku xiran tahay hadba inta la siiyo howlaha u dhigma ee degmadu masuulka ka tahay.

Haddii codsiga aan la ogolaan ama ay taageerada dhaqaale noqoto mid aan sax ahayn waxaa loo dacwoon karaa maxkamada dastuuriga ah.Haddii racfaanku ku saabsan yahay lacagta degmadu ogolaatay ama qaabka tacliimeedka waxaa dacwada loo gudbinayaa qaybta sharciyada hubisa.

Degmadu waxaa ay xaq u leedahay iney kormeerto dugsiyada xanaanada ee sida gaarka loo leeyahay ee la ogolaaday.Waana in taasi dhacdaa sanad walba.

Qofka furaaya xanaano si gaar ah loo leeyahay waajib kuma aha inuu ogolaanso weysdiisto degmada. Balse ogolaanshaha degmadu waa muhiim sababatoo ah howshu waxaa ay u baahan tahay kharashka degmadu bixiso si xanaanadu u shaqeyso. Caawinaad dhaqaale waxaa ay ku xiran tahay indegmadu ogolaato xanaanada sida gaarka ah loo leeyahay.

Xanaano si gaar ah loo leeyahay waxaa ay raacdaa sharciyada qaranka ee lagu hago iskuulada degamdu maamusho.
Meelaha caruurtu tagaan wakhtiyada ay iskuulka soo dhameeyaan waxaa uu raacaa sharciyada quseeya ama haga howlaha noocaan oo akle ah ee degmadu maamusho

Xanaano barbaarin oo si gaar ah loo leeyahay

Xanaano barbaarin waa isu-geynta howlo xanaano oo badan halkaasoo uu ” xanaanada guriga” ee ilmaha halguri lagu ururiyo oo lagu hayaa ay qayb ka tahay. Ujeedadu waxaa weeye in la helo dug-siyo xanaano oo lakala dooran karo oo ka baxsan kuwa degmadu maamusho

Sharciyada maamulka ee ay dejisey hayàda is-kuulada ayaa saldhig iyo hogaamin u ah dhamaan howlaha xanaanada.Waxaana joogi kara caruurta da`doodu u dhexayso 1 sano ilaa 12 sano. Sharciga in la hubiyo diiwaanka qofka ka shaqeynaaya xanaanoouinka iyo meelaha caruurtu ku sugan yihiin waa mid waajib ah oo mar walba la sameeyo.

QAYBAHA ISKUULADA EE WAAXDA CARUURTA- IYO TACLIINTA

Xafiiska qaabilaada ee qaybaha iskuulku waxaa uu furan yahay saacadaha 08.00-16.00

Qaybta waqooyi ee degmada
(Norra kommundelen**)**

Waxaa qayb ka ah Fanthyttan, Öskevik, Guldsmedshyttan, Storå, Löa, Stråssa iyo Ramsberg.

Xafiiska qaabilaada: Storåskolan
Ciwaanka waa: Solviksvägen 1, 711 76 Storå
Taleefoon: 0581-846 02
Fax: 0581-402 06

Dugsiyada xanaanada ee degmada : dugsiga xanaanada ee Hagabacken
Ku yaal Guldsmedshyttan, dugsiga xanaanada ee Lysmasken
Oo ku yaal Storå iyo dugsiga xanaanada ee ku yaal Ramsberg.

Dugsiyada xanaanada ee sida gaarka ah loo leeyahay:
Dugsiga xanaanada ee Trollebo, ku yaal Löa, www.loaskola.se,
Taleefoon : 0580-301 95
Dugsiga xanaanada Kokillen, ku yaal Guldsmedshyttan,
www.kokillen.se, Taleefoon: 0581-419 09

Qaybta galbeed ee degmada
(Västra kommundelen)

Waxaa ka mid ah Brodalen iyo Stadsskogen ee ku yaal Lindesberg.

Xafiiska qaabilaada waxaa uu ku yaal : Stadsskogsskolan
Ciwaanka waa: Högstadievägen, 711 35 Lindesberg
Taleefoon: 0581-815 65
Fax: 0581-154 45

Dugsiyada xanaanada ee degmada : Dugsiyada xanaanada Kristallen, Kungsfågeln, Stadsskogen iyo Stöttestenen , ku yaal Lindesberg.

Dugsiyada xanaanada sida gaarka loo leeyahay:
Dugsiyada xanaanada Solberga, ku yaal Lindesberg. www.solbergaforskolor.se
Taleefoon: 070-222 11 34

Qaybta bari ee degmada
(Östra kommundelen**)**

Waxaa qayb ka ah Hagaberg iyo Kyrkberget, centrala Lindesberg, Gusselby, Grönbo iyo Spannarboda

Xafiiska qaabilaadu waxaa uu ku yaal iskuulka : Björkhagaskolan
Ciwaanka waa: Björkhyttevägen 47, 711 33 Lindesberg
Taleefoon : 0581-812 28, 0581-812 33
Fax: 0581-811 94

Dugsiyada xanaanada ee degmada : Dugsiyada xanaanada ee Björken, Grönsiskan, Haga, Kyrkberget iyo Tallbacken ee ku yaal Lindesberg

Dugsiyada xanaanada ee sida gaarka ah loo leeyahay:
Dugsiyada xanaanada ee Pilkrog, www.pilkrog.se

Taleefoon: 0581-910 84

Qaybta koonfureed ee degmada (Södra kommundelen)

Waxaa qayb ka ah Fellingsbro, Frövi, Rockhammar, Vedevåg iyo Finnåker

Xafiiska qaabilaada waxaa uu ku yaal iskuulka : Fröviskolan
Centralvägen 67, 718 31 Frövi
Taleefoon: 0581-833 01
Fax: 0581-312 83

Xafiiska qaabilaada waxaa uu ku yaaliskuulka : Ekbackens skola
Ciwaanka waa: Sparstavägen, 732 71 Fellingsbro
Taleefoon: 0581-833 62

Dugsiyada xanaanada degmada : Dugsiyada xanaanada Bergknallen ee ku yaal Vedevåg, dugsiyada xanaanada ee Mariedal, Näsby iyo Skogsdungen ee ku yaal Frövi, dugsiga xanaanada Lönngårdenee ku yaal Rockhammar iyo dugsiga xanaanada ee Gläntan ee ku yaal Fellingsbro

Dugsiyada xanaanada ee sida gaarka ah loo leeyahay:
Dugsiga xanaanada ee Slangbellan, www.slangbellan.se,
Taleefoon: 0581-62 13 10